



## Khayraadka iyo Taageerada Heerka 2

Waaxda Waxbarashada Hore iyo hay'adaha ay isbahaystaan ayaa si adag uga shaqaynaya si ay u hubiyaan inay ka qaybgalayaasha Early Achievers helaan noocyo kala duwan oo khayraadka iyo taageerada si ay u caawiyaan dadaallada horumarinta tayadooda.

---

### Tababarka

Taxanaha Tababarka Shaqaalaha ayaa diyaar u ah agaasimayaasha xarunta ka qaybgalaysa iyo bixiyayaasha daryeelka carruurta qoyska oo lacag la'aan ah. Taxanaha wuxuu ka kooban yahay lix tababar oo loogu talagalay inay siiyaan asaasiga ku saabsan qiimaynta iyo fikradaha lagu qiyaasi doono Heerarka 3 – 5.

Si loo hubiyo helitaanka dhammaan ka qaybgalayaasha, saddex ka mid ah tababarka waxaa lagu bixin doona qaabka online iyo saddex kalena waxay noqon doonaan tababaro kuwa sida caadiga ahaa looga dhibo gobolka oo dhana.

- ◉ Eegitaanka Qiyaasta Qiimeynta Bey'adda iyo Habka Darajeynta Eegitaanka Fasalka (*onlayn*).
- ◉ Tilmaamayaasha Waxbarashada Hore ee Washington (*onlayn*)
- ◉ Waxyaabaha laga doonayo Gobolka Washington Daryeelka Hore iyo Xirfadlayaasha Waxbarashada (*onlayn*)
- ◉ Xoojinta Qoysaska
- ◉ Hordhaca Kartida Dhaqanka
- ◉ U-diyaargarowga Dugsiga

La xiriir xafiiska deegaankaada ee Child Care Aware of Washington si aad u ogaato waxyaabaha ku saabsan tababarada kugu dhow. <http://wa.childcareaware.org/about-us/our-regions>

### Caawinta Farsamada

Taagyeero farsamo oo lacag la'aan ah (TA) ayay heli karaan ka qaybgalayaasha oo dhan inta ay socoto howsha Heerka 2. Xafiiska deegaankaada ee Child Care Aware of Washington ayaa ku siin doonaa takhasuse TA ah oo kaala shaqeyn doona inaad si guule u maarayso Early Achievers iyo isugu diyaariso qiimeynta. Taageerada TA waa kuwo si gooni ah loogu diyaariyay inay soo buuxiyaan baahida xarunta, oo waxaa ka mid noqon kara:

- ◉ Taageerada Farsamo ee codsiyada Early Achievers, oo ay ku jiraan gargaarka MERIT.
- ◉ Khayraadka iyo qalabka la xiriira meelaha heerka tayada Early Achievers.
- ◉ Macluumaad iyo taageero si ay si fiican ugu fahmaan qiimaynta loo isticmaalay Early Achievers - Cabirka Heerka Degaanka (ERS) iyo Nidaamka Qiimeynta Dhibcaha Fassalada (CLASS).

- ⊙ Dib ula socoshada Taxanaha Tababarada Xirfadlayaasha, muujinta shakhsinimo, iyo qorshayaasha falalka ka caawinaya ku dabaqida aqoonta cusub barnaamijkaaga.

### **Wakhtiga Beddelka**

Xulashada Bedelayaasha waxaa loogu talagalay si ay uga taageeraan daryeelka carruurta qoyska iyo bixiyayaasha xarunta daryeelka carruurta in ay ka shaqeeyaan dhinaca horumarinta hadafka xirfadeed si ay u gaaraan Heerka 3 ee Early Achievers ama wax ka sareeya iyagoo u ogolaanaya in bedelayaashu soo buuxiyaan hawlahaan soo socda:

- ⊙ Taxanaha Tababarka Early Achievers ee Heerka 2.
- ⊙ Buuxinta is-qiimaynta, qorshayaasha ficilka, ama buuxinta waraaqaha taageeraya.
- ⊙ Hawlaha Sixitaanka Early Achievers.
- ⊙ Caawinta Farsamada ee Early Achievers iyo Tababaris.
- ⊙ Diyaargaraynta Cabirka Darajeynta Bey'adda (ERS).
- ⊙ Habka Cabirka Eegitaanka Fasalka (CLASS).
- ⊙ Waxbarashada/darajooyinka Xirfadaha Horumarinta ama shahaadada barnaamijyada.

Xarumaha u qalma in ay isticmaalaan Macalimiinta Ku Bedelashada:

- ⊙ U adeegay ugu yaraan hal cunug oo hela kaalmada mudadii ahayd 12kii bilood ee ugu dambeeyey.
- ⊙ Ku qoran Early Achievers iyo ka shaqaynaya inay gaaraan qiimeynta Heerka 3.
- ⊙ Xaalada Shatiga wanaagsan: waxay ka macno tahay haysashada shatiga aan dhicin, aan la joojin, ama aan heerka tijaabo ahayn.

[The Imagine Institute](#), oo ah urur aan macaash doon ahayn oo ay qandaraas la gashay DEL, ayaa maamuli doona liiska Macalimiinta Bedelashada. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan liiska Macalimiinta Bedelashada, u dir email [subpool@imaginewa.org](mailto:subpool@imaginewa.org), ama wac 206.492.5244.

### **Deeqaha kusaleysan Baahida**

Ka qaybgalayaasha Early Achievers waxay xaq u leeyihiin Deeqaha Baahida kusaleysan si ay uga gudbaan caqabadaha kahortaagan gaaritaanka qiimeynta Heerka 3. Taagyeerada waxaa ka mid ah iibsashada alaabta si loo hagaajiyo dhibcaha ERS ama CLASS (sida buugaagta, qalabka sayniska, qalabka dhaqdhaqaaqa guud, iyo in ka badan), macalimiinta bedelashada, horumarinta manhajka iyo qalabka wax lagu barto, iyo waxyaabaha kale ama qalabka waxtarka u leh in la kor loo qaado tayada barnaamijka. Xarumahu waxay kala shaqayn karaan xafiiska degaankood ee Child Care Aware of Washington ama waxay u soo codsan karaan si u gaar ah. Foomamka codsiga waxa laga helaa barta internetka ee <https://del.wa.gov/earlyachievers/pre-rating>.

Wixii su'aalo ah oo ku saabsan deeqda Baahida Kusaleysan, u dir email [needs.basedgrants@del.wa.gov](mailto:needs.basedgrants@del.wa.gov).

## Heerka Dhaqaale celinta

Bixiyayaasha ka qaybgalaya Early Achievers oo u adeega carruurta iyo qoysaska hela Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Ku Xiriirinta Shaqada (Working Connections Child Care “WCCC”) waxay xaq u yeelan karaan in ay helaan lacag u celinta kaalmada sare.

Xeerka Dib loo Eegay ee Washington (RCW) 43.215.545 wuxuu u qoondeeyay koror ah 2% heerka saldhiga kaalmada WCCC ee la siiyo bixiyayaasha ku qoran Early Achievers ee ka shaqeeynaya hawlaha gaaritaanka Heerka 2. Bixiyayaashu waa inay gaaraan qiimeynta Heerka 3 ama wax ka sareeya 30 bilood gudahood markii ay is diiwaangeliyaan si ay u sii helaan abaalmarinta. Bixiyayaasha lagu qiimeeyo Heerka 3 ama waxii ka sareeya ee hela kaalmada WCCC waxay xaq u leeyihiin inay helaan kaalmada heerka sare ah oo ku salaysan heerka lagu qiimeeyo tayadooda.

## Deeqaha Waxbarasho

Deeqaha waxbarashada ayaa diyaar u ah ka qaybgalayaasha Early Achievers si ay uga taagyeeraan hadafkooda horumarinta xirfadeed ee joogtada. Waxaa jira laba nooc oo ah deeqda waxbarashada ee la heli karo:

- ◉ Washington Scholarship for Child Care Professionals “Deeqaha waxbarashada Washington ee Xirfadlayaasha Daryeelka Carruurta”, oo ay maamusho Child Care Aware of Washington. Macluumaadka ku saabsan fursadaan waxaa laga heli karaa barta internetka ee halkan: <http://www.childcarenet.org/providers/scholarships>.
- ◉ Deeqda Early Achievers, oo ay maamulaan Guddiga Kuliyaadaha Farsamada iyo Bulshada ee Gobolka. Macluumaadka ku saabsan fursadaan waxaa laga heli karaa barta internetka ee halkan: <http://www.sbctc.edu/colleges-staff/grants/early-achievers-grant-program.aspx>.

Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa barta internetka ee <https://del.wa.gov/professional-development/plan-your-early-learning-career>. Ha iloobin in aad la xiriirto qofka lagala xariiro jaamacada si aad u eegto fursadaha kale ee laga heli karo.

## Taagyeero ayaa la heli karaa marka la dhammaystiro Heerka 2

### Deeqda Baahida Kusaleysan ee Dhammeystirka Heerka 2

Xarumaha Early Achievers ee bixiya adeegyada qoysaska hela kaalmooyinka daryeelka carruurta gobolka ee buuxiya howlaha Heerka 2 inta u dhaxaysay Julaay 1, 2016 iyo 1 Juun, 2017 waxay xaq u leeyihiin deeq hal mar ah oo dhan \$250. Dhiirigalintan dhaqaale waxay siisa taagyeero dheeraad ah ka qaybgalayaasha si ay ugu diyaar garoobaan qiimeynta. Marka Codsiga xarunta ee Heerka 2 ay ansixiso MERIT, oo la ansixiyo foomka W-9/libiyaha Gobolka Washington oo dhana ee laga xareeyay Waaxda Waxbarashada Hore, xaruntu waxay u qalmi doontaa dhiirigelinta dhaqaale.

Fadlan la soco waa in foomka W-9/libiyaha Gobolka Washington oo dhana laga xareeya Waaxda Waxbarashada Hore. Haddii aadan hubin inaad leedahay lambar, waxaad ka eegi karta xogta online ka ah: <http://www.des.wa.gov/services/ContractingPurchasing/Business/VendorPay/Pages/VL.aspx>.

Haddii aadan lahayn lambar, mid ayaa lagu siin kara adigoo soo buuxinaya iyo soo diraya [foomka Hay'adda Bixiyaha Gobolka oo dhan/foomka W-9](#). Dhiirigelinta dhaqaale waa fursad hal mar ah oo aan la heli karin markii la dhafo Juun 2017.

## Taagyerooyin ayaa la heli kara Qiimeynta Kaddib

### Abaalmarinada Horumarinta Tayada Heerka 2

Bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee guriga qoyska ee ka qaybgalaya Early Achievers ee lagu qiimeyay Heerka 2 waxay xaq u yeelan karaan Abaalmarinta Hagaajinta Tayada. Abaalmarinta waxaa loo isticmaali karaa hawlaha taagyeera dib-u-qiimaynta. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Abaalmarinada Hagaajinta Tayada waxaa laga heli karaa [Tilmaamaha Howlaha Kaqaybgalka Early Achievers](#), ama email-ka ah [QRIS@del.wa.gov](mailto:QRIS@del.wa.gov).

